

Ka-ilaalinta Carruurta Ku-xadgudubka Kaga yimaada Waalidiinta iyo Daryeeleyaasha

HEL XAQIIQOYINKA

Anagoo ah dad waaweyn waxaan ka qaadanaa kaalin muhiim ah xagga ka-ilaalinta carruurta waxyeellada.

Maaddaama aad tahay waalid ama daryeele, waxaad leedahay masuuliyadda kowaad ee ilaalinta iyo daryeelidda carruurtaada iyo taageeridooda inay yeeshaan xiriir ammaan ah oo ixtiraam leh.

Waxaad kaloo kaalin muhiim ah ka qaadataa ogaanshaha iyo ka-warcelinta ku-xadgudubka shakiga leh oo ka jira bulshada. Runtii waxay noqon kartaa jariimo dambiyeed haddii aaf ku fashilanto inaad soo sheegto ku-xadgudubka galmeed ee ilmaha ee laga shakiyo.

SOO-SHEEGIDDA KU-XADGUDUBKA

Maxaan sameeyaa haddii aan ka shakiyo in ilmaha lagu xadgudubey?

Haddii aad rumaysan tahay in ilmaha lagu xadgudubey, ama uu qatar ugu jiro in lagu xadgudubo si degdeg ah ula xiriir Booliiska Victoria adoo maraya saldhigga booliiska ee degaanka ama ka wac 000 haddii ay degdeg tahay.

Maxaan sameeyaa haddii aan ka shakiyo in ilmo kale lagu xadgudubey?

Haddii aad ka shakido in ilmaha lagu xadgudubey, ama uu qatar ugu jiro in lagu xadgudubo (sida ku-xadgudubka jidheed, rabshadda qoyska ama dayacaad) waa inaad si degdeg ah ugu sheegtaa Child Protection ee Wasaaradda Department of Health and Human Services (DHHS) (ka eeg faahfaahinta xiriirka dhammaadka xaashidan macluumaadka).

- Haddii aad ka shakido in ilmaha galmo ahaan loogu xadgudubey, waa inaad u sheegtaa dareennadaada Booliiska Victoria. Waxaad galaysaa dambi jariimo ah haddii aad ka gaabiso inaad sidaan samayso.
- Waa inaad soo sheegtaa xataa haddii aadan hubin. Waa kaalinta haya'daha inay baaraan dareennadaada ayna go'aamiyaan haddii tallaabo dheeraad ah loo baahan yahay in la qaado.
- Waalidiinta iyo daryeeleyaasha waxay kaloo joogaan booska ilaalinta carruurta saaxiibdooda. Taasi waxay tahay sababta carruurta ay badanaa tahay inay sheegaan waayo-aragnimadooda xadgudubka ku dhaca facooda, kuwaas oo ayaguna halkooda la wadaagaan arintaas waalidiintooda iyo daryeeleyaashooda.

- Haddii ilmahaagu uu kaala hadlo wax ku saabsan saaxiibdooda, aadna ka shakiso in ilmaha lagu xadgudubey ama uu qatar ugu jiro in lagu xadgudubo, waa inaad tallaabo qaaddaa. Waxaa laga yaabaa inaad tahay qofka weyn oo jooga booska inaad tallaabo ka qaaddo markaasna ka-warcelintaaduna waxay muhiim u tahay ilaalinta ammaanka ilmaha.

Maxaan sameeyaa haddii aan ka shakiyo in ilmaha lagu xadgudubey markaasna haya'duhu ay mar hore baareen ayna diideen warbixintaydii?

Haddii aad hayso sababo cusub oo aad rumaysan tahay in ilmaha lagu xadgudubey, waa inaad usamaysaa warbixin kale DHHS Child Protection ama Booliiska Victoria. Warbixin kasta waxay muhiim u tahay ilaalinta ilmaha maaddaama ay sheegayso caddayn ayna ku caawinayso haya'daha inay helaan garashada cad ee qatarta ilmaha ku jiraan.

Maxaa ku dhacaya ilmaha lagu xadgudubey cid kale oo dugsiga joogta ay ka shakiso in ilmaha lagu xadgudubey?

Dhammaan xubnaha shaqaalaha ee ka shaqeeya dugsiga ilmahaagu waxaa looga baahan yahay inay ku-xadgudubka ilmaha ee laga shakiyo usoo sheegaan DHHS, Child Protection, iyo duruufaha qaarkoodna, Booliiska Victoria.

Dugsiga ilmahaagu ayaa kula soo xiriiri doona sida ugu dhaqsaha ba-dan, inay usoo-sheegeen sidaan inay sameeyaan DHHS, Child Protection iyo/ama Booliiska Victoria mooyee.

Halkii ay habboon tahay dugsigu wuu kula shaqayn doonaa si loo hubiyo in ilmahaagu la siiyo taageero, taas oo ay ka mid tahay udiridda xirfad-yaqaannada daryeelka.

Goormay tahay dambi jariimo ah inaan la soo-sheegin ku-xadgudubka laga shakiyo?

Qof kasta oo weyn wuxuu la kulmi karaa eedayn dambiyeed haddii ay rumaysan yihiin in qof weyn oo kale uu ku kacay dambi galmeed loo gaystay ilmo ka yar da'da 16 sano oo uusanna usoo sheegin macluumaadkaas booliiska.

XAQIIQOYIN KU SAABSAN KU-XADGUDUBKA ILMAHA

Waa maxay ku-xadgudubka ilmaha?

Ku-xadgudubka ilmaha

- Waxaa ka mid ah xadgudubka jidheed, xadgudubka galmeed, waxyeellada caadifadeed ama nafsiiyeed, dayaca ama rabshadda qoyska
- Maahan oo keliya inay ka mid noqoto xiriirka jidheed ama xoog (tus. ku-xadgudubka galmada ilmaha waxaa ka mid ah kala hadlidda ilmaha si qaab galmo muuqata ah)
- Waxaa ku kici kara xubin kasta oo bulshada ah, oo ay ku jiraan cid ku jirta qoyska ilmaha ama cid ku jirta dugsiga dhexdiisa.

Jidh-dilka la xiriirta ku-xadgudubka ilmaha wuxuu si weyn usaamayn karaa ladnaanta iyo koritaanka ilmaha. Tani waa sababta ay muhiim u tahay inaan dhammaan si degdeg ah uga warcelino qaab kasta oo ku-xadgudub laga shakiyo ah.

Waa maxay calaamadaha muujiya in ilmaha lagu xadgudubey?

Waxaa jira muujiyayaalka jidheed iyo kuwa dhaqameed oo ballaaran eek u-xadgudubka ilmaha.

Kuwa ugu muhiimsan oo ay tahay inaad wax ka qabato haddii aad og-aato wax kasta oo kuu sheegaya inaad citiqaad macquul ah ka qaadato in ilmahaas lagu xadgudubey, ama uu qatar ugu jiro in lagu xadgudbo, oo ay ka mid yihiin (hase ahaatee aan ku koobnayn):

- Isbaddelka dhaqanka ilmaha (tus. cidla-u-baxa, dhaqanka dib-u-dhaca, ama dhaqano galmeed aan da'da ku-haboonayn)
- Muujiyayaasha jidheed ee Xadgudubka (tus. nabaro aan la aqoon, bararo, calaamadaha nafaqo-la'aanta)
- Xiriirka aan haboonayn oo u dhaxeeya qof weyn iyo ilmo (tus. xiriirka jidheed oo aan haboonayn, hadiyado aan la aqoon ama xiriirka taleefan/email).

KAALINTA DUSGIGA

Sidee bay dugsiyadu uga warceliyaan ku-xadgudubka ilmaha ee laga shakiyo?

Dhammaan shaqaalaha dugsiyada Victoria way ku qasban yihiin inay ka warceliyaan dhacdo ama shaki kasta ee ku-xadgudubka ilmaha sida hoos lagu sheegay:

1. Ka-warceli degdegga ah

Wax ka qabo baahiyaha caafimaad iyo ammaan ee degdegga ah (tus. ku samee gargaarka kowaad ama la xiriir adeegyada degdegga).

2. U-sheeg haya'daha

Soo-sheeg DHHS Child Protection ama Booliiska Victoria citiqaad kasta oo macquula oo ah in ilmahaas lagu xadgudubey, ama uu qatar ugu jiro in lagu xadgudbo.

3. La-xiriir waalidiinta/daryeeyaasha markay habboon tahay

La-xiriir waalidiinta/daryeeyaasha isla markii ay haya'duhu kugula taliyaan inay ammaan tahay oo habboon tahay in sidaas la sameeyo.

Runtii waalidiinta/daryeeyaasha waxay ka qaadani doonaan kaalinta ugu weyn ee xagga siinta taageerada carruurtooda, si kastaba ha ahaatee dugsiyada waxaa lagula talin doonaa inaysan la xiriirin waalidiinta/daryeeyaasha markay jiraan duruufaha halkaas oo ay qarin karaan baarista ama ilmaha ukeeni karaan qatar ka sii weyn.

4. Sii taageero joogto ah dhammaan carruurta ay saamaysey ku-xadgudubka

Sii taageerada ku habboon dhammaan carruurta ay saamaysey ku-xadgudubku. Tan waxaa ka mid noqon kara la-talin joogto ah oo laga helo xirfad-yaqaannada. Taageerada joogtada ah ee ilmaha waxaa lagu muujin doonaa *Qorshaha Taageerada Ardayga*.

Tallaabooyinkaas waxaa lagu qoray faahfaahinta dheeraadka ah ee *Aqoonsiga iyo Ka-warcelinta Dhammaan Qaababaka Ku-xadgudubka ee ka jira Dugsiyada Victoria*.

Shaqaalaha jooga dugsiga ilmahaagu ma looga baahan yahay inay soo-sheegaan ku-xadgudubka ilmaha?

Haa – dhammaan shaqaalaha jooga dugsiga ilmahaagu waxaa looga baahan yahay sharci ahaan inay soo-sheegaan citiqaad kasta oo macquula oo ah in ilmahaas lagu xadgudubey, ama uu qatar ugu jiro in lagu xadgudbo.

Duruufaha qaarkood, waxay ku noqon kartaa dambi jariimo ah shaqaalaha dugsiga inay ka gaabiyaan inay usoo-sheegaan ku-xadgudubka ilmaha haya'daha.

ILAAALINTA ILMAHAYGA

Maxaan samayn karaa si aan gacan uga gaysto baridda iyo ka-ilaalinta imahayga ku-xadgudubka?

Bal la sheekayso ilmahaaga waxaadna hubisaa in asaga ama ayada ay garanayso inaan la ogolayn in loo hanjabo, dhaawaco ama sinaba loo taabto taas oo ka dhigta inay dareemaan raaxo-darro.

Xiriir kasta waa inuu noqdaa mid ixtiraam leh cidna waa inaysan u dhaqmin si ayaga ka dhigta inay dareemaan ammaan la'aan ama cabsi.

Dugsiga ilmahaagu waxaa kaloo uu taageerayaa ilmahaaga xagga baridda xuquuqdooda inay noqdaan kuwo ammaan ah oo la ixtiraamo. Dugsiyada dowladda Victoria waxay baraan barnaamijka **xiriirada ixtiraamka leh** kuwaas oo horumariya itijaaha iyo dhaqamada habboon waxaana loola jeedaa ka-hortagga rabshadda qoyska.

Maxaan ka hadlaa markaan u sharxayo ammaanka ilmahayg?

Waxaa jira waxyaalaha qaarkood oo aad guriga ku samayn karto si aad u dhiso garashada amaamka iyo xiriirada ixtiraamka leh oo ay ka midka yihiin:

- Si furan ugala hadlidda ilmahaaga wax ku saabsan dareennadooda iyo xiriira-dooda
- Hubsiiimada inay garanayaan inaad dhagaysanayso aadna tallaabo qaadayso haddii ay dareen ka qabaan ku saabsan sida cid kastaa ula dhaqmayso
- Adeegsiga magaca saxaa ee qaybaha jidhka iyo la yeelashada sheekooyinka da'dooda ku habboon oo ku saabsan taabashada iyo falka galmada.
- u-ogolaanta ilmahaaga inay ogaadaan in dadka waaweyn aysan marna waxyeellayn Karin ama kula kicin qaab galmo ilmo kasta.

Ka-dhigidda carruurta kuwo ammaan ku ah dibadda guriga ama dugsiga

Waxaad ka qaadataa kaalin muhiim ah xagga hubinta in carruurtaadu ay waqti ku qaadanayaan meelo ammaan ah.

Halkan Victoria dhammaan dadka kuwaas oo la shaqaynaya carruur-taada sida tababareyaasha iyo bareyaasha muusikada waxay u baahan yihiin inay haystaan Hubinta La-shaqaynta Carruurta.

Waxaad kaloo hubin kartaa in shaqaale kastaa iyo folanteerada waqti la qaadanaya ilmahaaga saacadaha dugsiga laga baxo ee weekendiska inay haystaan Hubinta La-shaqaynta Carruurta oo sax ah.

Haddii aad u malaynayso inaad u baahan tahay caawimaad si looga dhigo carruurtaada kuwo ka ammaan ah waxyeello aadna u taageerto horumarinta caafimaadkooda, waxaa muhiim ah inaad hesho caawimaad. Ka eeg Better Health Channel ee Dowladda Victoria wixii macluumaad ah ee raadinta taageerada. Ka eeg www.betterhealth.vic.gov.au.





MACLUUMAAD DHEERAAD AH

Halkee baan ka heli karaa macluumaad iyo taageero dheeraad ah?

Waxaad si toos ula xiriiri kartaa DHHS Child Protection iyo Booliiska Victoria si aad ugala hadasho wixii dareeno ah oo aad qabto oo ku saabsan ladnaanta ilmaha (ka eeg faahfaahinta xiriirka bogga soo-socda)

Haddii aad qabto wax dareen ah oo ku saabsan ilmahaaga ama ilmo kale oo dhigta dugsiga ilmahaaga la hadal maamulaha ama xubin kale ee shaqaalaha dugsiga ah wax ku saabsan dareennadaada. Waxaad kaloo la soo-qaadi kartaa arintan DHHS Child Protection iyo Booliiska Victoria.

Wixii macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan halka laga helo taageero si aad carruurtaada uga dhigto kuwa ammaan ka ah waxyeellada ka eeg Better Health Channel ee Dowladda Victoria:

www.betterhealth.vic.gov.au

Wixii macluumaad dheeraad ah:

■ Kaalinta dugsiga ilmahaaga ee ka-hortagga iyo maareynta ku-xadgudubka ilmaha:

www.education.vic.gov.au/protect

■ Muujiyayaasha Xadgudubka, ka eeg

www.education.vic.gov.au/protect

Haddii aad wax ka qabto ama aadan hubin wax ku saabsan ka-warcelinta iyo/ama aad jeceshahay inaad kala hadasho cid ka bax-san dugsiga fadlan la xiriir:

■ Xafiska Gobollada dugsiyada dowladda Victoria:

www.education.vic.gov.au/about/contact/Pages/regions.aspx

■ Xafiska Waxbarashada Diocesaka Degaanka Dugsiyada Kaatooliga:

www.cecv.catholic.edu.au/About-Us/Dioceses

■ Dugsiyada Madaxa-Bannaan ee Victoria:

www.is.vic.edu.au/who-we-are/contact-us/

LA-XIRIIR MACLUUMAADKA

Adeegga 24 saac ah

Booliiska Victoria	000
Wasaaradda Adeegyada Caafimaadka iyo Insaanka ee Child Protection	131 278
Laanta Adeegyada Nabadgelyada ee Wasaaradda Waxbarashada iyo Tababarka	(03) 9589 6266

Wasaaradda Waxbarashada iyo Tababarka

Laanta Adeegyada Ammaanka	(03) 9589 6266
Laanta Dhacdooyinka iyo Kabashada Ardayda	(03) 9637 2934 ama (03) 9637 2487
Waaxda Sharciga	(03) 9637 3146
Barnaamijka Caawimadda Shaqo-helidda	1300 361 008
Caafimaadka Shaqaalaha	(03) 9637 2395
Laanta Asluubta Shaqaalaha	(03) 9637 2595
Laanta Gaarnimada	(03) 9637 3601
Waaxda Caalamiga	(03) 9651 3976
Waaxda Isgaarsiinta	(03) 9637 2871

Waxbarashada Kaatooliga ah

Archdioceseka Melbourne: ■ Xafiiska Asluubta Xirfad-yaqaanka, Itikada & Baarista ■ Adeegyada Sharciyeed ■ Khadka Macluumaadka Ladnaanta Ardayda ■ Laanta Isgaarsiinta & Suuq-gaynta (La-taliyaha Warbaahinta)	(03) 9267 0228
Dioceseka Sale	(03) 5622 6600
Dioceseka Ballarat	(03) 5337 7135
Dioceseka Sandhurst	(03) 5443 2377

Dugsiyada Madaxa-Bannaan

Dugsiyada Madaxa-Bannaan ee Victoria	(03) 9825 7200
---	----------------

Gobolada

Waqooyi Bari ee Victoria	
Wax-weydiinta Guud	1300 333 231
Xafiiska Benalla	(03) 8392 9500
Xafiiska Glen Waverley	(03) 8392 9300
Waqooyiga Galbeed ee Victoria	
Xafiiska Bendigo	(03) 5337 8444
Xafiiska Coburg	(03) 9488 9488
Koofurta Bari ee Victoria	
Xafiiska Dandenong	(03) 8765 5600
Xafiiska Moe	(03) 5127 0400
Koofurta Waqooyi ee Victoria	
Wax-weydiinta Guud	1300 333 232
Xafiiska Ballarat	(03) 5337 8444
Xafiiska Footscray	(03) 8397 0300
Xafiiska Geelong	(03) 5225 1000
Xafiiska Horsham	(03) 5310 5300
Xafiiska Warrnambool	1300 333 232

Wasaaradda Adeegyada Caafimaadka iyo Insaanka ee Child Protection

Gobolka	Goobaha Dowladda Hoose(LGAs)	Lam. Taleefanka
LGAs Xaafadaha Waqooyiga iyo Galbeedka	Banyule, Brimbank, Darebin, Hobsons Bay, Hume, Maribyrnong, Melbourne, Melton, Moonee Valley, Moreland, Nillumbik, Whittlesea, Wyndham, Yarra.	1300 664 977
Eastern suburban LGAs	Boroondara, Knox, Manningham, Maroondah, Monash, Whitehorse, Yarra Ranges.	1300 360 391
Southern suburban LGAs	Bayside, Cardinia, Casey, Frankston, Glen Eira, Greater Dandenong, Kingston, Mornington Peninsula, Port Phillip, Stonnington.	1300 655 795
West Rural and Regional LGSs	Ararat, Ballarat, Golden Plains, Hepburn, Hindmarsh, Horsham, Moorabool, Northern Grampians, Pyrenees, West Wimmera, Yarriambiack, Colac-Otway, Corangamite, Glenelg, Greater Geelong, Moyne, Queenscliffe, Southern Grampians, Surf Coast, Warrnambool.	1800 075 599
North-western rural and regional LGAs	Buloke, Campaspe, Central Goldfields, Gannawarra, Greater Bendigo, Loddon, Macedon Ranges, Mildura, Mount Alexander, Swan Hill.	1800 675 598
North-eastern rural and regional LGAs	Alpine, Benalla, Greater Shepparton, Indigo, Mansfield, Mitchell, Moira, Murrindindi, Strathbogie, Towong, Wangaratta, Wodonga.	1800 650 227
Eastern and south-eastern rural and regional LGAs	Bass Coast, Baw Baw, East Gippsland, Latrobe, South Gippsland, Wellington.	1800 020 202

Child First

Alpine	1800 705 211
Ararat	1300 783 341
Ballarat	1300 783 341
Banyule	(03) 9450 0955
Bass Coast	(03) 5662 5150
Baw Baw	1800 339 100
Bayside	1300 367 441
Benalla	1800 705 211
Boroondara	1300 762 125
Brimbank	1300 138 180
Buloke	1300 665 218
Campaspe	1800 260 338
Cardinia	(03) 9705 3939
Carrurta iyo qoysaska Aborijiinka - ardinia	(03) 9794 5973
Casey	(03) 9705 3939
Carrurta iyo qoysaska Aborijiinka - Casey	(03) 9794 5973
Central Goldfields	1800 260 338
Colac-Otway	(03) 5232 5500
Corangamite	(03) 5232 5500
Darebin	(03) 9450 0955
East Gippsland	(03) 5152 0052
Frankston	1300 721 383
Gannawarra	1300 665 218
Glen Eira	1300 367 441
Glenelg	1300 543 779
Golden Plains	1300 783 341
Greater Bendigo	1800 260 338
Greater Dandenong	(03) 9705 3939
Carrurta iyo qoysaska Aborijiinka - Greater Dandenong	(03) 9794 5973
Greater Geelong	1300 551 948
Greater Shepparton	1300 854 944
Hepburn	1300 783 341
Hindmarsh	1800 195 114
Hobson's Bay	1300 775 160
Horsham	1800 195 114
Hume	1300 786 433
Indigo	1800 705 211
Kingston	1300 367 441
Knox	1300 369 146
La Trobe	1800 339 100
Loddon	1800 260 338
Macedon Ranges	1800 260 338
Manningham	1300 762 125
Mansfield	1800 705 211

Maribyrnong	1300 775 160
Maroondah	1300 369 146
Melbourne	1300 775 160
Melton	1300 138 180
Mildura	1300 625 533
Mitchell	1800 663 107
Moira	1300 854 944
Monash	1300 762 125
Moonee Valley	1300 775 160
Macedon Ranges	1300 783 341
Moorabool	1300 786 433
Moreland	1300 721 383
Mornington Peninsula	1800 260 338
Mount Alexander	1300 543 779
Moyne	1800 663 107
Nillumbik	(03) 9450 0955
Northern Grampians	1800 195 114
Port Phillip	1300 367 441
Pyrenees	1300 783 341
Queenscliff	1300 551 948
South Gippsland	(03) 5662 5150
Southern Grampians	1300 543 779
Stonnington	1300 367 441
Strathbogie	1300 854 944
Surf Coast	1300 551 948
Swan Hill	1300 665 218
Towong	1800 705 211
Wangaratta	1800 705 211
Warrnambool	1300 543 779
Wellington	(03) 5144 7777
West Wimmera	1800 195 114
Whitehorse	1300 762 125
Whittlesea	(03) 9450 0955
Wodonga	1800 705 211
Wyndham	1300 775 160
Yarra	(03) 9450 0955
Yarra Ranges	1300 369 146
Yarriambiak	1800 195 114

Other Services

Xaruumaha Lidka ku ah xadgudubka Galmada (CASA) – Khadka La-talinta Degdegga ah & Taageerada 1800 806 292	1800 806 292
Australian Childhood Foundation	1800 176 453
Children’s Protection Society	(03) 9450 0900
Child Wise	(03) 9695 8900
Vic Aboriginal Education Association	(03) 9481 0800
Child Safety Commission	1300 782 978
Office of the Children’s eSafety Commissioner	1800 880 176
Victorian Aboriginal Child Care Agency (VACCA)	(03) 9287 8800
Victorian Aboriginal Community Controlled Health Organisations (VACCHO)	(03) 9411 9411

Bixiyayaasha Adeegyada La-tacaalka Dhaqanka Xadgudubka Galmada ah

Aust Childhood Foundation	(03) 9874 3922
Children’s Protection Society	(03) 9450 0900
Berry St	(03) 5822 8100
Xadgudubka Galmada ee Mallee	(03) 5025 5400
South Eastern CASA	(03) 9928 8741
Ballarat CASA	(03) 5320 3933
Barwon CASA	(03) 5222 4318
Campaspe CASA	(03) 5441 0430
Gippsland CASA	(03) 5134 3922
Goulburn Valley CASA	(03) 5831 2343
Upper Murray CASA	(03) 5722 2203
Wimmera CASA	(03) 5381 9270

